

UNIVERSITY OF GOTHENBURG
DEPARTMENT OF LANGUAGES AND LITERATURES
P.O.B. 200 • SE 405 30 GOTHENBURG • SWEDEN

INTERMEDIATE SOMALI READER

*Assembled, adjusted and commented by
Morgan Nilsson*

Updated
24 May 2022

*This is work in progress. Read it critically!
Feel free to contact me with comments.*

morgan.nilsson@gu.se

Preface

The majority of texts in this reader have been collected from ... Where necessary, some of the texts have been slightly shortened or otherwise simplified.

Symbols

Qayb libaax

C. C. D., Minneapolis: X 2020

pdf http://humanitieslearning.org/resource/uploads/LIONS_SHARE_pdfsmall11.pdf

educator guide http://humanitieslearning.org/resource/uploads/Lion's%20Share%20Guide%20-%20Somali_final.pdf

mp3 <http://humanitieslearning.org/resource/uploads/3%20-%20The%20Lion's%20Share%20-%20Somali.mp3>

video <https://vimeo.com/348908381>

xx

Xx

Dhegdheer

C. C. D., Minneapolis: X 2020

pdf http://humanitieslearning.org/resource/uploads/DHEGDHEER_pdf.pdf

educator guide http://humanitieslearning.org/resource/uploads/Dhegdheer%20Guide%20-%20Somali_final.pdf

mp3 <http://humanitieslearning.org/resource/uploads/5%20-%20Dhegdheer,%20A%20Scary%20Somali%20Folktale%20-%20Somali.mp3>

video <https://vimeo.com/349919742>

discussion <https://vimeo.com/500217162>

alternate endings <https://vimeo.com/500217162>

purposes <https://vimeo.com/500217379>

reactions <https://vimeo.com/500217408>

other scary stories <https://vimeo.com/500217448>

xx

Xx

Wiil-Waal

C. C. D., Minneapolis: X 2020

pdf http://humanitieslearning.org/resource/uploads/WIILWAAL_pdf1.pdf

educator guide http://humanitieslearning.org/resource/uploads/Wiil%20Waal%20Guide%20-%20Somali_final.pdf

mp3 <http://humanitieslearning.org/resource/uploads/7%20-%20Wiil%20Waal%20-%20Somali.mp3>

video <https://vimeo.com/349911735>

a descendant of Wiil-Waal's <https://vimeo.com/500217666>

historical references <https://vimeo.com/500217729>

Wiil-Waal's character <https://vimeo.com/500217537>

Wiil-Waal's nickname <https://vimeo.com/500217623>

xx

Xx

Cigaal Shidaad

C. C. D., Minneapolis: X 2020

pdf http://humanitieslearning.org/resource/uploads/IGALSHIDAD_pdf.pdf

educator guide http://humanitieslearning.org/resource/uploads/Igal%20Shidad%20-%20Somali_final.pdf

mp3 <http://humanitieslearning.org/resource/uploads/9%20-%20The%20Travels%20of%20Igal%20Shidad%20-%20Somali.mp3>

video <https://vimeo.com/349918859>

xx

Xx

Soodoog

Cabdulqaadir C. Diiriye, London: Garanuug 2020, bogagga 1–7

mushaaxaa *walks, strolls*

kharaar/qaraar -ka *bitterness*

sawaxan -ka *noise, voices,
shouting*

guux -a *noise, roar, rumble*

muquuraa *dives*

Qofkii dumar ah ee soo muuqataba waxay la raacaysay indhaha, waayo ma garan karto sida saaxiibteed Xaawo u ekaatay soddon iyo kow sano oo ay kala maqnaayeen. Waxaa maskaxdeeda dhex mushaaxayay mawjado xusuus ah oo macaan iyo kharaarba leh, oo yaraanteedii iyo xaafaddii ay ku kortay dib ugu celinayay. Sawaxanka dadka, guuxa gawaarida, iyo dabaylo ka dhacayay garoonka diyaaradaha ayaa hadba kala goynayay xusuustaas fog ee Faadumo dhex muquuranaysay.

Labo saacadood ka hor ayay diyaaraddii Faadumo la socotay soo degtay. Inkastoo boorsooyinkeedii dhaqso u soo baxeen, farxadda ay ka heshay inay waddankeedii ku soo noqotay ayay ku illawday inay alaab sidatay, oo markay soo degtayba, toos ayay u abbaartay miisaskii ay fadhiyeen saraakiisha socdaalku si ay waddanka degdeg ugu gasho. Dadkii

dibedda u soo baxay ee boorsooyinka
jiidanayay ayay ku xusuusatay
kuweedii, markaas ayay damacday
inay dib u noqoto. Laakiin dhib ayay
kala kulantay in loo oggolaado inay u
gudubto meesha boorsooyinku
yaalleen, oo ciidanka ammaanka ayaa
hor joogsaday. Ciidanku amarka ay
fulinayeen ayaa ahaa in qof fasax gaar
ah sita maahee aan qof kale loo
oggolaan inuu soo galo gudaha.

Dibedda ayay mar kale u soo baxday.
In yar markay fadhiday, ayay aragtay
wiil dhallinyaro ah oo xiran dharkii ay
xirnaayeen shaqaalaha garoonka.

“Eeddo...”

“Haa Eeddo...?”

“Eeddo ma i caawin kartaa?”

“Maxaa jira? Maxaan kaa caawiyaa?”

“Eeddoow waxaan illaaway inaan soo
qaato boorsooyinkaygii”

“Xaggee ka timi?”

“Eeddo hadda Dubai ayaan ka soo
kacay laakiin reer Maraykan ayaan

ahay... Eeddow waa kuu ducaynayaaye ma ii soo saari kartaa boorsooyinka?”

“Wallaahi ma aqaan. Bal i sug aan qolyaha amniga la hadlee.”

Wiilkii wuxuu galay garoonka gudahiisa. Xoogaa markuu maqnaa ayuu soo noqday.

“Eeddo ma sidataa warqaddii uu ku qornaa tirsiga alaabtaada?”

“Haa, haa..., sug Eeddo aan soo bixiyee.” Boorsadii ay gacanta ku sidatay ayay ka soo saartay warqado yaryar oo laga soo siiyay garoonka Dubay oo ay ku yaallaan lambarrada alaabteedu.

Wiilkii mar kale ayuu warqadihii yaryaraa kula noqday gudaha.

Faadumo waxay markii hore welwel ka qabtay in ay alaabteedii waydo. Hadda welwel cusub ayaa kii hore ugu biiray. Waxay ka shakiday wiilka naftiisu inuu alaabta soo qaato oo irrid kale kala baxo.

“Haddaan magaciisa weydiin lahaa...
Ilaahoow sahal.”

Warka qurbaha loogu soo sheegi jiray wuxuu ahaa in dadka waddankii ku haray, ay ammaanada iyo asxaanku ku yaraadeen oo ay siyaabo kala duwan dadka wax uga qaataan.

Waa barqo dheer oo xoogaa qorraxda ayaa soo kululaanaysa, laakiin kulka ma dareensana Faadumo oo waxay isha ku haysaa illinka hore ee garoonka dadka ka soo baxaya. Ku dhowaad 20 daqiiqo ka dib ayuu soo baxay wiilkii isagoon gacanta waxba ku sidan.

“Eeddo kaalay, qolyaha amniga ayaa ku raba.”

Faadumo waxay raacday wiilkii. Wuxuu gudbiyay saddex irridood oo labo ka mid ah shaqaalaha keliya loo oggol yahay. Wuxuu u sheegayay ilaalada in uu oggolaansho ka haysto madaxda amniga.

Xoogaa ka dib ayuu soo galiyay Faadumo meeshii alaabtu taallay.

“Soow kuwaan maaha boorsooyinkaagii?”

“Haa Eeddo.”

“Haye, sug aan kuugu yeero wiilal kula qaada.”

“Eeddo dhib ma leh anigaa...”

“Maya Eeddo waa culus yihiin boorsooyinku. Sug in yar.”

Wiilkii ayaa soo kaxaystay dhallinyaro kale waxayna jiideen boorsooyinkii Faadumo ilaa ay dibedda ugu saareen.

“Eeddo ma kuugu yeernaa tagsi? Yaa kula qaadaya alaabta?”

Faadumo oo shakisan ayaa tiri, “Maya eeddo... een... gabar aan saaxiib nahay ayaa ii soo socota... Mahadsanid, Eeddo.”

Wiilkii boorsooyinkii wuxuu ugu tiiriyay meel gidaar ah.

“Haye Eeddo. Ilaahay ha ku nabad yeelo.”

“Eeddo... maxaan ku siiyaa?”

“Waxba Eeddo. Maalin walba sidaas ayaan dadka u caawinnaa. Ku soo dhowoow dhulkaaga hooyo.”

Wiilkii, isagoon dib soo eegin, ayuu ku noqday gudihii.

Saacad kale ayay Faadumo joogtay garoonka dibeddiisa.

Wiilkii ayaa mar kale ka soo baxay garoonka.

“Eeddo weli ma joogtaa?”

“Eeddo ma aqaan wax ku dhacay saaxiibtay. Waaba la soo hadlay xalay laakiin hadda teleefanka ma qabanayso.”

Waxaa soo muuqday saddex qof oo dumar ah oo kala da’ ah. Dhinaca irridaha garoonka looga soo baxo ayay ku degdegayaan indhahana ku hayaan. Markay irriddii hore galeen oo in cabbaar ah maqnaayeen ayay haddana soo noqdeen oo dadkii dibedda taagnaa mid mid u eegeen. Waxay u soo dhowaadeen Faadumo.

“Walaal magacaa? Faadumo miyaa tahay?”

“Haa, yaa waaye?”

“Walaal Xaawo ayaa na soo dirtay. Waa kaa soo daahnaye raalli ahaw.”

“Xaawo meeday, maxaa ku dhacay?”

“Hawlo xaafadda ah ayay ku mashquushay walaal ee soo bax annagaa ku kaxaynaynee.”

Faadumo alaabtii ayaa gabdhihii u saareen baabuur ay wateen iyadana kursiga hore ayaa la fariisiiyay. Xoogaa iswaraysi iyo isbarasho ayaa lagu mashquulay intii baabuurku garoonka ka soo fogaanayay. Gabadha ugu yar dumarka waxay ahayd Sahro oo ah curadda Xaawo. Faadumo aad ayay ugu faraxday aragtida curadda saaxiibteed.

Faadumo ma garan karin in dariiqyada ay maraysaa yihiin kuwii dhisnaa waagii ay waddanka joogtay. Daarihii gaagaabnaa waxaa beddelay kuwo dhaadheer, markaa dariiqii wuxuu u ekaaday inuu ka yaraaday

intii uu ahaan jiray. Waxaa kaloo laga yaabaa in Faadumo waddooyinkii Maraykanka ee waaweynaa weli maskaxdeeda ku sii sawiran yihiin.

Dhismayaasha markay mid garato ayay ka qiyaas qaadanaysay meesha la marayo. Waxay kaloo isku dayaysay inay garato meelaha waddooyinku iska gooyaan, oo markii la soo gaaro meel isgoys ah, waxay weydiinaysay gabdhaha magaca isgoyska. Qaar magacyadoodii waa isbeddeleen qaarna weli sidii ayaa loo yaqaan.

Markii horeba magacyada meelaha muhiimka ah, sida suuqyada iyo isgoysyada, waxaa laga qaadan jiray dhismayaasha u dhow, sida huteellada ama makhaayadaha. Haddii huteelladii iyo makhaayadihii isbeddeleen, magacyadiina waa isbeddeleen.

Cabbaar markii la socday ayaa Faadumo joojisay hadalkii. Wejiga waxay saaratay maro oo indhaha keliya ayaa ka muuqaday. Indhaha waxaa ka socda ilmo aanay celin karin. Gabdhihii uma jeedaan wejiga

Faadumo oo gadaal ayay gaariga ka fadhiyaan. Cabbaar markii Faadumo hadli wayday ayaa Sahro la hadashay.

“Eeddo magaalada wax badan ayaa iska beddelay soow maaha?”

Jawaab ma helin Sahro.

Gabdhuhu waxay u haysteen in Faadumo daallan tahay ama aanay maqlin hadalka Sahro. Darawalkii ayaa mar eegay dhinaca Faadumo. Wuxuu arkay ilmo ka socota oo qoysay maradii wejiga ka saarnayd.

“Walaal ma fiican tahay?”

Ma jawaabin Faadumo.

Waxaa la marayay meel xusuus xanuun badan Faadumo ku reebtay. Waa meelihii ugu dambeeyay ee ay maagalada ka aragtay intaanay ka qixin dagaalladii sokeeye. Waa meeshii lagu aasay ninkeedii Xuseen. Maahayn meel qubuur ah, laakiin danta ayaa ku qasabtay dadkii inay qof walba meesha uu ku naf waayo ka qodaan god jirka qarín kara, markaana ciidda ku rogaan.

